# XAASHIDO XAQIIQDA # 5

# Saboolnimada ku saleysan shaqada

Sidee dadka midab kala sooca ahi ugu liitaan xagga shaqada?

Waxa jira mushahar la taaban karo oo muhiim ah iyo nusqaamaha shaqo ee Kanada. Sababaha keenaya nusqaamaha in ay yeelato qoto dheer oo ballaadhan waa cunsuriyadda nidaamsan ee shaqaalaynta iyo dalacsiinta; dib-u-dhiska soogalootiga sababto ah aqoonsi la'aanta aqoonta caalimiga ah iyo khibrad; iyo u adeegsiga hubinta diiwaanka boolisa si ay u takooran codsadaha

**Shaqo la'aanta Daahsan:**

Dadka midabka leh ee ku nool Ontaariyo waxay leeyihin shaqo la'aan ka sareyso tan dadka cad-daanka ah ee la deggan. Ragga la midab-sooco ayaa boqolkiiba 24 u badan in ay shaqo la'aan yihiin marka loo eego dadka aan jinsiga ku xir-nayn. Haweenka la takooro ayaa boqolkiiba 43 ayay ka badan tahay in ay shaqo la'aan yihiin marka loo eego raga aan jinsiga ku xirnayn. Shaqaalaha Socdaalka: Tirada socdaalka shaqaalaha kumeelgaarka ah ee Kanada ayaa ka badan afarlab tan iyo sanadkii 2000. Ilaa sanadki 2018ka waxaa dalka ka jiray 429,340 shaqaale oo ku meel gaar ah. Shaqaalaha ku jira daruufaha mushaarka hooseeya ee ku meelgaarka ah oo siaan caadi ahayn ay u shaqeeyaan shaqaale midab leh oo ka socda koofurta adduunka ayaa si gaar ah ugu nugul u isticmaalka xadgudubka

**Midab-takoorka:**

Shaqaalaha beeraha ee soogalootiga ah ee On-taariyo, oo badankood yihiin Mexico iyo Caribbean, waxay leeyihin difaac yar oo xagga sharciga ah. Hal daraasaad ayaa laga helay boqolkiiba 75 shaqaalaha beeraha soogalootiga ah ayaa la soo sheegay in ay kala kulmaan Kanada cunsuriyanimo ka badan marka loo eego tan Maraykanka.

**Shaqo aan macquulahayan:**

Dadka midab-kala sooca – dadka asaliga ah iyo dadka midabka leh labadaba iyo soogalootiga ayaa si aad ah loogu metalay shaqo waqti-dhiman iyo shaqo aan sugneyn oo lagu garto mushaarka hooseeyo oo manfacyada aay ka maqanyihiin iyo shaqo la'aanta.

Majiro qorshe dawladeed oo wax looga qabanaayo arrimaha saamaynta ku leh shaqaalaha midabka leh iyo shaqaalaha soogalootiga ah sida: loo shaqeeyayaasha ku xadgudbay qodobda xeerarka shaqada ee ciqaab la'aanta; shaqaalaha aan awoodin in ay soo ceshadaan mushaharka lumay sababtuna ay tahay loo shaqeeyaha dib -u-shaqaynta; iyo cabsi laga qabo in aad lumiso shaqadiisii iyo in bulshada dhexdeeda laguugu liisto – cabsi aad u weyn oo ka jirta bulshooyinka asaliga ah iyo bulshooyinka midabka leh.

## Diirad gelinta Dadka Asaliga Ah:

Sanadkii 2015ka, dadka asaliga ah ayaa si hoose wakiil ugu ahaa inta badan "xirfadaha aqoonta" – xirfadaha maamulka iyo aqoonta farsamada, kuwaas oo inta badan u baahan waxbarasho dugsiga sare ka dib oo ay helaan mushaar fiican. Waxay ka yar yihiin dadka aan asaliga ahayn in ay ka sheeyaan xirfahada maareynta (7.1% vs 9.5%) ama ganacsiga, maalgelinta iyo shaqooyinka maamulka (14.4% vs 17%). Warbixin caafimaad ee 2018ki, boqolkiiba 63 dadka asaliga ah ayaa shaqo la'aan ahaa marka loo eego celceliska boqolkiiba 7 Ontaariyo; iyada oo boqolkiiba 87 ay ku hoos nool yihiin dakhliga loo yaqaan LICO.(dakhli goosad ah) Shaqaalaha asaliga ah ee shaqeeyo saacado buuxo waxay kasbadeen celcelis ahaan $26 saacaddi sanadkii 2015ka, halka dadka aan asaliga ahayn ey heleen celcelis ahaan $27.41 halki saac.

**Colour of poverty/Colour of Change**
March 2019
www.colourofpoverty.ca
Shaqadeydii waan waayey, waan gaajoo-nayaa. Waxaan lacag ugu baahanahay caruurteeda…. Si fiican uma fakiri karo… foomka (warqada sheegashada) ay bixiyaan waa mid aad u dhib badan…. Waxay qaadatay sideed bilood illaa baaritaanka. Hassan, qiyaasti 7 kun oo dollar ayuu ku guuldaraystay oo mushaarka aan la bixin ah. Intii lagu guda jiray 5 sanadood laga bilaabo 1987 ilaa 1992kii, boqolkiiba 72 dadka dakhligooda hooseeyo boqolkii 10 ayaa kor u qaaday jaranjarada dakhliga, lakiin illaa 2007da-2012ka boqolkiiba 60 ayey hoos u dhacdey.

## Qoraalka  Degdeg Ah:

Markaan tixraacno dadka midabka leh ayaan ka hadlaynaa dadka reer Kanada ee asal ahaan aan Yurub ka soo jeedin ama dhaxalka – labadaba dadka midabka leh ee u dhashay Kanada iyo sidoo kale kuwa ku dhashay meel kale. Markaan tixraacno dadka asaliga ah waxaan u hadleynaa shaqsiyaadka ummada koowaad, Inuit iyo Metis. Magaalada Toronto boqolkiiba 62 dadka ku nool saboolnimada waxay ka soo jeedaan kooxo isir-raac ah. Boqolkiiba 52 dadka midab takoorka Kanada ee ku nool saboolnimada waxay ku nool yihiin Ontaariyo. Reeraha hoos tago dakhligoodu hooseeyo ee Kanada (LICO) oo ah dakhli goosad ama cabirka dakhliga hoose (LIM), waxay ku bixiyaan boqolkiiba in aad ku badan dakhligooda daruuriga aasaasiga ah sida cuntada iyo hoyga marka loo eego qoyska caadiga ah; sidaan ayaanu u cabbir naa saboolnimada. Midab-kala sooca habbeysan ayaa badanaa keena xaqiraad hey'ad qarsoon oo ku saabsan siyaasahada, dhaqannada iyo habraacyada mudnaanta u leh ama u faa'iido darro u noqon kara koox dad ah. Waxay noqon karta natiijada ka soo baxda sida wax loo sameeyo mar walba iyada oo an latixgelinaynin sida ay u sameeyan kooxo gaar ah si ka duwan sidii hore.

**Caddeyn:**
Aqoonsiga soogalootiga iyo waayo aragnimada shaqo inta badan

waa la qiimo-darreeyaa ama waa la qiimeeyaa; boqolkiiba 41 dadka sida daran u liito (ee hoos taga LICO 5 sano oo isku xigta) soogalootiga ayaa haysto shahaadooyin.
Magacyada: Daraasado badan ayaa caddeyay in loo shaqeeyayaashu ay ku takooraan codsadayaasha shaqada ee wata magacyada Afrikaanka, Aasiya ama muslimka "dhawaaqyada" xitaa marka codsadayaashu leeyihiin aqoon u dhigma iyo waayo aragnimo, sinaan isku mid ah ayaa lagu muujiyaa iyada oo lagu saleynayo meesha uu qofku deggan yahay.
**Boliiska:** Loo shaqeeyayaashu waxay adeegsadaan hubinta diiwanka booliska ee nidaamka shaqaalaynta waxay xireysaa ka saaridda kooxaha asaliga ah ee sida weyn loo ilaaliyo, madowga iyo bulshooyinka kale ee midabka leh ee ka a socda suuqa shaqada.
**Takoorid:** Daraasado dhowr ah ayaa sheegaya in takoorida lagu sameeyo shaqaalaha heerka shaqo la'aanta oo sarreyso, nabadgelyo darro/shaqo halis badan, iyo mushahar hoose iyo dakhliyadu ay ka qayb qaataan tirade sii kordheysa ee qoysaska cunsuriyadda ah ee ku nool saboolnimada.

Shaqaalaha socdaalka ah ee ku dhaawacmay shaqada waxaa sida caadiga ah dib loogu celiyaa dalalkoodii ay ka yimaadeen, ayagoo ka hor staagaya in ay helaan daaweyn loo baahan yahay, daaweyn laga yaabo in aysan ka heli karin dalalkooda, iyo magdhawga shaqaale ay ka helaan wixi ay xaq u leeyihin

Shabakada Faa'iidooyinka Bulsho Toronto (TCBN) waxay ka shaqeysaa sugida shaqada iyo fursadaha tababar shaqo dhamman barnaamijyo kaabayaasha bulshada ee kooxaha uraadinta sinnaanta iyo bulshooyin ka taariikh ahaan liidata ee aagga weyn ee Toronto.

www.communitybenefits.ca
info@communitybenefits.ca

Xiriirka saaxiibtinimada asaliga ee Ontaariyo waa shabakad xarumood oo u dhaqmo siidi xaruumo dhaqameed halkaasoo xubnaha bulshada asaliga ahi ay ka raadsan karaan taageero xagga shaqada iyo yoolalka waxbarashada, qoyska caafimaadka, cadaaladа, iyo adeegyo kale oo badan.
www.ofifcs.org/
ofifc@ofifc.org